



# Baaq Caawinaad ah ee ilmaha Dib-udhaca Xoogan leh ka Saacidaya Akhriska iyo Qorista

(Tips to Support Reading and Writing for Children with Significant Disabilities—Somali version)

Waxaa baaris lagu sameeyay habka ugu wanaagsan ee ilmaha dib-udhaca xoogan leh looga saacidi karo qorista, akhriska iyo xirfadaha xiriirka hadaleed. Baaqa halkan ku qoran waxey ku saleysan yihiin baaris oo waxeey ka caawinayaan in in aad ilmahaaga ku dhiiro geliso qorista iyo akhriska.

## 1. Wax u akhri gabadaada ama wiilkaaga.

Wax u akhri ilmahaaga sida iyagoo ku fahmaya ama leh karti ay ku bartaan luqadda aad wax ugu akhrineyso. Habka keliya oo qof walba oo dib-udhac culus leh, ilmahu ka mid yihiin, luqad ku baran karaan wa iyagoo maqla luqadaa.

Sida laga soo guuriyeye qoraalka (Alligton, 2006; Anderson, Willson, & Fielding, 1988), “Mid ka mid ah waxyaabaha astaan u noqda in guul laga gaaro akhriska, waa xaddada qofku ku qarashgareeyo akhriska. Micnaheedu waa hadba qofku intuu akhriska badiyo, ayuu akhriska ku wanaagsananaya.

Tani micnaheedu waa in aad u akhrisa ilmahaaga inta aad awoodo, xitaa hadaad isleedahay uma baahna intaa oo akhris ah. Ilmaha dib-udhaca xooggan leh inta badan waa ku litaan akhriska, qorista iyo xiriirka. Sababto ah waqti badan ayaa uga luma daaweyn iyo dhaqaatiir bahidooda daradeed. Si faraqaa dib u dhaca akhriska iwm ah loo qanciya, waxey u baahan yihiin jawi dadku u akhrinayo, ama kala hadlayo aduunka ku heraarsan.

## 2. Hubi in ilmahu helayaan hab ay ku xiriiraan.

Qof walba cod ayuu u baahan yahay, qaas ahaan tani wa muhiim ilmaha dib-udhaca xooggan leh. Si luqad ay u abuuranto, qofka waa in uu helaa hab uu ku xiriiri karo. Waxaa jira qalab badan oo ilmaha ka caawiya in ay xiriiraan. La xiriir PACER, xarunta Simon Technology si aad u ogaato waxyaabaha ilmahaaga heli karaan ([PACER.org/stc/library](http://PACER.org/stc/library)).

Markaad hesho qalab xiriireed ee u shaqeynaya ilmahaaga, tus ilmahaaga habka loo isticmaalo qalabka. Waxey ka caawineysa in ilmahaagu ku wanaagsanadaan isticmaalka qalabka, dabadeedna uu kobco xiriirkooda. Waxaa jirta xeelad sahlan oo aad isticmaali karto, ee loo yaqaan C.A.R.

- Oraah bixin - Intaad wax tiraahdo, dabadeedna sug il’aa shan il-biriqsi.
- Weydii – Weydii su’aaldabadeedna sug il’aa shan il-biriqsi.
- Jawaab – Ka jawaab, adoo fasiraad ku daraya.

## 3. Ilmo walba waxey u baahanyiin had ay wax u qoraan.

Ilmaha qaarkood, qalinka caadiga ah ama qalin rasaaska ayaa u shaqeeya. Qaarna, qalin qalab casriyeeyan ah, ama komputerka wax lagu qoro ayey u baahan karaan, casriga maanta la marayo. Ilmaha dib-udhaca xooggan leh waxa laga yaba in ay u baahan yihiin in ay helaan hab ka duwan habka caadiga ah oo ay wax u qoraan ama u yeeriyaan. Waxaa jira qalab badan oo u bedeli kara qalinka caadiga ah, sida qalab indhaha qofka ka hogaaminaya oo hadba xruuftu qofka eego qoraya, mid qiyaasaya oo u dhameystiraya hingaadda, ama mid wax lagu qoro oo qofku meel walba u qaadan karo. La xiriir xarunta Pacer Simon technology center, hadaad

---

dooneyso warbixino siyaada ah oo ku saabsan qalabka qalimaanta u doorin kara. [PACER.org/stc/library](https://www.pacer.org/stc/library).

*Sida laga soo guuriyey qoraalka (Arlington, 2012) “Every learner needs to write about something that is personally meaningful to them” Qof walba oo waxbaranaya waa u baahan yahay in ay qoraan waxyaabaha shaqsi ahaan iyaga micno u leh.*

Gabadhaada ama wiilkaaga ku dhiiro geli in ay wax xaqiiqa ah qoraan, u habey in ay dad ay kula xiriiri karaan email, oo ay xiriir is weydaarsadaan, ha qoraan bugaag ku saabsan qoyska, ama ka fikir hab kale oo ilmahaaga ku dhiiro gelineysa in ay qoraan madhab ay xiiseynayaan. Isku dey in aadan isku taxluujin in ay in ay si sax ahu qoraan. Isku dey in aadan isku taxluujin inaad saxdo waxey qoreen, ee isku dey in aad tusto qoraalo si wanaagsan loo qoray oo ay tusaalo ka dhigtaan. In ay good ahaan wax qoraan ku dhiiro geli. Markey qoraan bog buuxa, dabadeed bilow in aad ka caawiso xirfadda qorista, tasoo loo bari kara si casharo gaagaaban ah. Adoo wanaag u fikiraya, rajadaadu ha sareyso. Ilmaha dib-udhaca culus leh waxey baran karaan xirfado muhiim ah, oo kor u qaadeysa kartidooda akhriska, qoraalka iyo xiriirka.